**Sharci lamba. 23 ee 21 Disember 1965**

**Sharciga la Xiriira Canshuurta Fanta**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la tixgeliyey ansixidda Golaha Qaranka;

**WAXAA LA SOO SAARAY**

Sharciga soo socda:

**CINWAANKA 1AAD**
**Qodobada Guud**
**Qod. 1**
**Awoodda Sharci ee Canshuurta**

Waxaa la soo saaray canshuur la xiriir bandhigyada aflaanta ee dalka Somaaliya.

**Qod. 2**
**Ciddi Canshuurta ku Waajibtay**

Waxay ku waajibtay canshuur shaqsi kasta oo jira ama qaynuuni ah ee laga qaado lacagta fiirsashada masrax sida ku qoran qodobka 4aad.

**Qod. 3**
**Waxyaalaha la Canshuuro**

Waxyaalaha canshuurta laga qaado waxaa ka mid ah:

a) aflaanta filimadda iyo masraxyada kale;
b) bandhigyada farshaxanka ah, kuwa sayniska ah, kuwa ganacasiga, bandhigyada beeraleyda, warshadaha, fiyooraha iyo wixii la mid ah;
c) Masrax tiyaartaka, ruwaayadaha, kuwas heesaha, kuwa isboortiga, bandhigga ciyaalka lagu dheelsiiyo oo aysan ku jirin kuwa ku tilmaaman faqradaha a) iyo b).

**Qod. 4**
**Canshuurta loo Maleeyey**

1. Waxaa muhim ah bixinta lacaggta oo ku xiran qiimaha masrax, taas oo iibinta tikidhada, ama tesseraha lagu galo ama casuumadaha kadib markii laga reebo inta lagu qoray faqradaha sare ku xusan;
2. Canshurta waxaa lagu dhiibi doonaa so gelidda sida ku tilmaaman faqradda sare;
3. Kharajka so gelida waxaa ku jira qiimaha tikedhada ee iridda.

**Qod. 5**
**Maxaa ka Reeban**

1. Waxaa ka reeban in ay canshuur dhiibaan kuwa tesseraha so gelidda loo qeybiyey si lacag la’aan ah laakin waa in lambarkooda uusan ka badan boqolkiiba 5. Tesseraha lacag la’aanta ee sare ku tilmaaman laguma dari karo kuwa loo qeybiyey midiyaha ama adeegyada kale sida ku cad faqradda 2 ee qod. 13 iyo saraakisha qaabilsan so ururinta canshuurta;

2. Waxaa kale oo ka reeban bandhigyada oo macaash la'aanta ama taakuleynta kuwaa oo si guud ah ama nus laga qaadi doono canshuurta, iyadoo loo baahan yahay amaro horay loo soo saaray ee Wasaaradda Maaliyadda.

**Qod. 6**
**Heerka Canshuurta**

Heraarka canshuurta waxaa loo dhigay sidatan:

a) Bandhigyada xarafka a) qod. 3 heerka 30%;
b) Bandhigyada xarafka b) qod. 3 heerka 5%;
c) Bandhigyada xarafka c) qod. 3 heerka 15%;

**Cutubka 2aad**
Caddeynta Canshuurta

**Qod. 7**
**Tikedka Gelitaanka**

1. Si loo hubiyo qiimaha canshuurta ku waajibtay waxaa qasab ah in la bixiyo tikidhada oo laba qeyb oo isku dhegan sida habar iyo gabar (2 qeybood oo isku dheggen) oo lambar isku xirxiran laba midab kala duwan leh si loo gala garto qeybaha kale duwan ee fadhigga;
2. Waa in 2 nooc oo tikidha ah la heli karo si haddii ay dhacdo in wax laga beddelo qiimaha gelitanka in isla tikidkii la isticmaalin markasto;
3. Tikidhada lagu gado nus qiimahooda waa in la caddeyo nooca iyo sababta la loo dhimay qiimaha;
4. Tikidhada lacag la'aanta waa in leeyihiin astamaha lagu xeeriyey qodobka 9;
5. Tikidhada gelinta waa in mar hore Xafiiska Maaliyada ee qaabilsan ay soo duleelisay.

**Qod. 8**
**Xayeeysiinta Qiimaha Tikidhada**

Qiimaha bandhigyada waxaa loo baahan yahay in lagu xayeeysiiyo boorarka ama shax oo lagu dhejiyey albaabyada goobta.

**Qod. 9**
**Tesseraha iyo Tikidhada Lacag La'aanta ah**

1. Tesseraha magac ku qoran oo si joogta looga dhigay lacag la'aan oo laga reebay canshuur sida ku qoran faqradda 1aad ee qod. 5 waxaa loo baahan yahay in ugu horreynti laga soo shabadey Xafiiska Maaliyada ee quseeya;
2. Tikidhada ama casuumadyada lacag la'aanta kama badnaan karaan boqolkiiba 5%. Sidaas awgeed ciddii wadato tikidho lacag la'aan ah oo ka duwi doono tikidhada lacagta lagu gaday;
3. Tikidhada lacag la'aanta sida tikidhada caadi ah, waa in ay ka koobnadaan labada qeyb ee sida hooyo iyo gabar oo isku dhegen oo wato lambarro isku xigxigga;
4. Tikidhada lacag la'aanta ah waxaa ku waajibo canshuur sida ku qoran faqrad 3 ee qod. 4 isda tikidhadda oo laga qaato halka laga soo saaray;
5. Waxaa reeban in laga ganacsado tikidhada lacag la'aanta ah iyo casuumaadaha lacag la'aanta.

**Qod. 10**
**Diwaanka so gelidda iyo ka bixinta ee Tikidhada**

1. Ciddi mas'ul ka ah bixinta canshuurta waa in uu leeyahay diiwaan uu ku qoro tikidhada soo gala iyo kuwa ka baxa oo lambar wato horayna loogaga soo shabadey Xafiiska u xilsaaran qabashada canshuurta;
2. Diiwaankasi waa in markii ay codsadaan xubnaha u xilsaaran kormeerka iyo ilaalinta canshuurta la arki karo.

**Qod. 11**
**Ilaalinta Tikidhada**

1. Ciddi dooneyso in ay daawato bandhig waa in uu iridda laga galo goobta uu guddonsiya tikid ka kooban laba qeybood (hooyo iyo gabar). Qeybaha waxaa kala jari doono ciddii qaabilsan, oo siin doono daawadaha qeyb isagoo qeybta kale uu ku xafido doono sanduuq lagu xiray quful. Furaha sanduuqaasi waxaa hayn doono cidda mas'ul ka ah ama shaqaalihiisa;
2. Xafiiska maaliyada ee qabilsan so ururinta canshuurta haddii loo bahdo wuxuu siin doona quful u gaar sida ku qoran faqradda sare ku qoran si sanduqaasi lo furo oo keliya markii uu isago joogo.

**Qod. 12**
**Wajiibadka Daawadaha**

1. Daawadaha waxaa waajib ku ah in uu xafido qeybta tikidka ilaa iyo intii uu joogo goobta bandhigga;
2. Haddii, kadib barista xubnaha qaabilsan ilaalinta canshuurta laga waayo daawadaha waxaa qasab ku ah in mar kale uu gato tikidka;
3. Wajiibka sare ku xusan waa in si far waaweyn lagu muujiyaa shax ku dheggen albaabaha goobka bandhigga.

**Qod. 13**
**Xubnaha ilaalinta iyo Kormeerka**

1. Ilaalinta iyo kormeerka la xiriira ku dhaqanka canshuurta waxaa loo bahan yahay:
   a) Saraakiisha Xafiisyada qaabilsan ururinta canshuurta iyagoo wato tesseraha aqoonsiga;
   b) Xubnaha Qeybta Canshuurta Booliska;
   c) Xubnaha Booliska caadiga ah iyo goobaha oo ay ka maqan yihin xafiisyada iyo xubnaha ee xaryadaha a) iyo b).
2. Ciddi u shaqeyso wuxuu xaq u leeyahay Xafiiska Maaliyada ee qaabilsan so uruurinta canshurta waa in uu helaa 2 tessero oo adeega oo fursad u siinayo in uu galo nooc kasto ee bandhig ah;
3. Saraakiil ku-Xigeenka iyo askarta Ciidanka Booliska Canshuuradka waxay fursad furan u yeeli doonaan in ay galaan kadib markii ay helaan warqad qoraal ah ee laga soo saaray Saldhigga.

**CINWAANKA 3AAD**
Qaadista iyo Diridda Canshuurta

**Qod. 14**
**Qadista Canshuurta**

1. Canshuurta waxay noqoneysa mid loo bahan yahay in lagu shubo Xafiiska qaabilsan maalin kasta ilaa iyo maalinta 5aad;
2. Haddii lala daaho lacag bixinta waxaa ku waajibi doonto ganax ilaa 10%;

3. Sarkaalka u xil saaran soo ururinta canshuurta waxaa haddii ay jirto sababo kalifay wuxuu baa’bin kara wixii ganax,
4. 10 beri kadib laga bilaabo waqtiga Xafiiska haddi aanan la dhiibin canshuurta loo baahna waxaa la fulin kara si xoog ah.

**Qod. 15**
**Dhameeystirka Canshuurta**

1. Si loo hirgeliyo, maalin kasto bandhigga ama xiridda goobta baa’biinta canshuurta;
2. Waxaa noqon karo dhameeystirka canshuurta waxaa la tirin doona tirada tikidhada la iibiyey iyo tirada lacagta guud ahaaneed iyadoo qaab sida la xiriira qodobadaasi.

**Qod.16**
**Diwaanka lacagta Tikidhada Shubay**

1. Cidda ku waajitay bixinta canshuurta waxaa loo baahan yahay in uu keydiyo diiwaanka lacagta laga helay tikidhadaha ee labada qeybood (hooyo iyo gabar) oo si isku xig-xgta loo lambareeyey oo haddana lacaga soo shabadey Xafiiska u qaabilsan qaadista canshuurta;
2. Diiwaanada la isticmaalay waa in lagu xafido ilaa iyo muddo 1 sano si toos ahna ay xubnaha ilaalinta iyo kormeeka ay u yeeshan fursad baaritaan.

**Qod. 17**
**Qabka ku Shubista Canshuurta**

1. Maalin kasta sida ku qoran qod. 15 waa in la qoraa tirada tikidhada iyado la kala sooci doono noocyada iyo qiimaha tikidhada, tirada la gaday laga bilabay tikidka 1aad ilaa iyo midka ugu dambeyey;
2. Waxaa saxiixi doono sarkaalka u qaabilsan uruurinta canshuurta;
3. Kala fujinta laba dhinac ee tikid kasta waxaa iska leh sarkaalka u xilsaan waqtiga laga qaado lacagta gelidda.

**Qod. 18**
**Awooda Burin Xeerarka Guud**

Mararka qaarkood, markii ay dhiibato ka soo aroorta nooca bandhigga ama goobta uu ku yaala taas oo kalifto in la qiiyaso canshuurta loo baahan yahay in laga qaado si guud ah oo la qiiyaaso qiimaha canshuurta.

**Qod. 19**
**Awooda Xubnaha Ilaalinta iyo Kormeerka**

Xubnaha Ilaalinta iyo kormeerka eek u xusan qod. 13 waxay awood u yeesheeyn in ay takuuleeyan fulinta bixinta canshuurta iyo kormeerka lambaradda tikidhada lagu iibiyey qeybta makanikada iyo kuwa lagu keydiya sanduuqyada furaha lagu xiray sida ku qoran qod. 11.

**CINWAANKA 4AAD**
Ciqaabta

**Qod. 20**
**Ciqaabta Gaarka ah**

Haddii aysan falku gaarsisaneyn dembi ka weyn waxay ciddii isku day’da in ay ka dhumato canshuurta, ama si ula kac wax ka beddesha lacagta soo gasho

maalintii, ama fal qiyaano suubisa amase bixin weyda wixii ku waajibay, wuxuu muteysan doona ganaax Sh.So. 200 ilaa Sh.So. 2,0000 iyo canshuur u dhigmata 2 jibaar tii ku waajibtay oo uusan bixin iyo goobta bandhigga oo laga xiro.

**Qod. 21**
**Ciqaabaha Idaariga ah**

Ciqaabaha idaariga waxaa ka mid ah laguna kasban kara:

a) Haddii anaan la keydinin diiwaanka lagu qoro tikidhada soo galay iyo kuwa ka baxay sida ku cad qod. 10, waxaa lagu muteysan doona ganax Sh.So. 300 ilaa Sh. So. 1,200;
b) Isticmaalka tikidhada aan waafaqsaneyn qod. 7: bixinta lacagta dhan Sh.So 300 ilaa Sh.So. 1,200;
c) Ka gaabsashada in la bixiyo tesseraha shada  sida ku qoran qod. 13: bixinta lacagta  dha Sh.So. 60 ilaa Sh.So. 240;
d) Ka gabsashada in la kala saaro bixinta lacagaha sida ku qoran qod. 17: bixinta lacagta Sh.So. 30 ilaa Sh.So. 120
e) Haddii si qaab daran loo keydiyo diiwan tikidhada soo galay iyo kuwa ka baxay waxaa la muteysan doonaa ganax: Sh.So. 120.

**Qod. 22**
**Xubnaha Hubinta Arrimaha Sharci Darrada ah**

Waxaa loo xilsaaray in ay hubiyaan in sharciga la dhinac maray:

a) Saraakiisha Xafiisyada qaabilsan soo uruurinta canshuurta oo sita warqadaha aqoonsiga;
b) Xubnaha qeybta Ilaalinta Canshuurta ee Booliska;
c) Xubnaha caadiga ah ee ka tirsan Ciidanka Booliska, haddii aysan dadka lagu tilmaamay  xarafyada a) iyo b) aysan xarumo ku leeheen.

**CINWAANKA 5AAD**
Amarradda Gunaanadka ah

**Qod. 23**
**Burin**

Waxaa halkaa lagu buriyey xerarka la xiriira hey'adaha canshuuraadka ee dhinaca bandhigyada  iyo xeer kasto oo ka soo horjeeda ama khilaafaya Sharcigaan.

**Qod. 24**
**Hirgelinta Sharcigaan**

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco, waxaana la horgeyn doona Golaha Qaranka si sharci loogu beddelo sharci sida ku qoran qod. 63 ee Dasturka.

Muqdisho, 21 Disember 1965.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha
**Abdirizak Haji Hussein**

Wasiirka Maaliyada
**Awil Haji Abdullahi**